



Rasuulka Ilaahay-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- markuu janaabo ka qabaysanayo wuxuu dhiqi jiray gacmihiisa, wuxuuna u wayso qaadan jiray sida salaada uu ugu wayso qaato, ka dibna wuu qubaysan jiray

Caa'isha, Mu'uminiinta Hooyadood -Allaha ka raali ahaadee-waxay tiri: Rasuulka Ilaahay-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- markuu janaabo ka qabaysanayo wuxuu dhiqi jiray gacmihiisa, wuxuuna u wayso qaadan jiray sida salaada uu ugu wayso qaato, ka dibna wuu qubaysan jiray, isagoo faraha dhex galinaya timihiisa ilaa uu jirkiisa biyaha wada gaarsiiyo, saddex jeer ayuu biyaha isku shubi jiray, ka dibna jirkiisa kale dhan ayuu dhaqi jiray, waxay tiri- Caa'isha-: aniga iyo Rasuulka weel kaliya ayaan ku wada qubaysan jiray, oo aan labadayadu kawada darsan jiray biyaha.

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Albukhaari]

Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- markuu rabo inuu janaabo ka qabaysto, wuu ku bilaabi jiray inuu gacmaha dhaqo. Ka dibna wuu wayso qaadanayey sida waysada salaada, ka dibna biyaha ayuu jirkiisa gaarsiin jiray, ka dibna gacmaha ayuu timaha madaxa dhex galin jiray, ilaa uu i dhoho biyuhu waa gaareen timaha salkooga, jirkuna waa ka dhergay biyaha, saddex jeerbuu madaxiisa biyaha ku shubaayey, ka dibna jirkiisa kale ayuu dhaqi jiray. Waxay tiri Caa'isha-Allaha ka raali ahaadee-Aniga iyo Rasuulka scw ayaa weel kali ah ku wada qubaysanaynay, oo biyaha ka wada darsanaynay.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3316>

